London North West Healthcare NHS
NHS Trust

# Adeegyada carruurta ee Isbitaalka Ealing waxay isbadaleysaa Juun

**Qaar ka mid ah isbedelada waxaa loo qorsheeyay adeegyada carruurta ee Isbitaalka Ealing.**

**Warqadaan waxay sharaxeysaa isbedelka ugu weyn laakin fadlan sii joogteey isticmaalka adeegyadeena sida caadiga ah ilaa 30-ka Juun 2016.**

| Adeegyada ku harayo Isbitaalka Ealing | Adeegyada cusub ee Isbitaalka Ealing | Adeegyada waxaa la xirayaa 30-ka Juun 2016 |
|---|---|---|
| **Daryeelka degdega ee daaweynta carruurta**Ee ay bixiyaan Xarunta Daryeelka Degdega.<br><br>**Adeegyada guud iyo carruurta bukaank socxodka**<br>Tani waxay la mid tahay xarumaha isbitaalka iyo xarumaha isbitaalka bulshada ee sonkorta iyo neefta.<br><br>**Aan arimaha degdega aheyn, adeegyada daryeelka maalinta darnaanta hoose** sida qaliinka qaar, caafimaadka maskaxda iyo daaweynta dabiiciga ah. | **Hogaanka la talinta Xarunta caafimaadka daaweynta carrurta Rapid Access**<br>Iyada oo la siinayo DHaqtarka guud (GPs) helitaan dhaqso ah ee tallo gaar ah iyo waqtiga loo qabtay carruurta u baahan in ay arkaan qubare 48 saacadood gudahood.<br><br>**Ku xirayo Daryeelka Carruurta tijaabada Southall iyo Acton**<br>Bixinayo daryeelka u dhow guriga, iyada oo laga dhigayo in ay aad ugu dhawaato carruurta in ay u baahdaan in ay joogaan isbitaalka.<br><br>**Bulshada Carruurta Kooxda Kalkaalisada**<br>U guuraya Isbitaalka Ealing si ay ugu biiraan isbitaalka iyo daryeelka bulsda ee carruurta. | **Qeybta carruurta bukaan socodka**<br>16 sariiro, oo ay ku jiraan sariiraha qiimeynta afartra maalin. Hadeer daryeelo 10 ilaa 12 carruur sida bukaan jiifka ee hal jeer oo kale.<br><br>**Carruurta taqasuska ku leh daryeelka A&E**<br>Arimaha degdega ‘iftiin baluug ah’ ambalaansaha uma qaadayo markale kale carruurta Isbitaalka Ealing A&E.<br><br>Carruurta imaaneyso A&E waa la qiimeynayaa, xasiliyo iyo si ammaan ah loo gudbiyo sida loogu baahanyahay. |

Warbixin dheeraad ah waxaa la helayaa Maajo iyo dhammaan warbixinta ugu dambeyso,
booqo **www.healthiernorthwestlondon.nhs.uk**ama naga soo raac **@HealthierNWL**

## Ha iloobin in aysan aheyn kaliya isbitaalo bixiya daryeelka caafimaadka, daaweynada iyo tallada.

## Ogow sida loo helo adeegyada NHS

### NHS 111

Waa in aad garaacdaa 111 goorta aad u baahantahay tallo ama daaweyn caafimaad, laakin ma ahan hanjabaada nolosha, iyo haddii aad qabtid walaacyo degdeg ah ee ku saabsan caafimaadkaaga maskaxda.

### Farmashiyada

Farmashihaaga deegaanka si sareyso ayaa loo tababaray iyo waxay bixin karaan tallo iyo soo jeediyaan daawooyin ama daaweyno dhibaatooyin kala duwan oo caadi ah, sida madax xanuunka, dhibaatooyinka caloosha, qufaca iyo qabowga.

### Adeegyada Dhaqaatiirta Guud (GPs) & bulshada

Dhaqaatiirta Guud (GPs) iyo kooxdooda waxay bixiyaan adeegyo balaaran oo kala duwan oo qoyska oo dhan ah ee dhibaatooyinka jirka iyo dhibaatooyinka caafimaadka mamskaxda.

Dhaqaatiirta Guud (GPs) ee aaga Ealing hadeer waxay geli karaan Xarunta caafimaadka carruurta Rapid Access ee Isbitaalka Ealing, iyaga oo siinayo Dhaqaatiirta Guud (GPs) tallo gaar ah ee caafimaadka carruurta iyo helida balamaha gaarka ah.

### Xarumaha Daryeelka Degdega

Isbitaalka Ealing wuxuu leeyahay 24 saacadood maalintii, adeegyo todobo maalin isbuucii ee si degdega ah ku arki karo dadka weyn iyo carruurta laakin aan aheyn xaalada hanjabaada nafta, tusaale, sarmo yar, lafo jaban, caabuq iyo murgacasho.

### Shilka iyo Arimaha degdega (A&E)

A&E waa dadka qaba hanjabaada nafta iyo jiro weyn iyo dhaawacyo. Haddii aadan ka qeybgali karin A&E soo garaac 999 oo ambalaansa ah.